

JAMHURIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النّشرة الرّسمية لجمهوريّة صوماليّلاند

Sannadka Saad

Cadad Gaar ah

1/9/2016

XEERKA NOOTAA YOYOINKA  
Xeer No. 18/2001

Email: garyaqaankaguud@gmail.com  
Web. www.garyaqaankaguud.com

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**



**=GOLAHA WAKIILADA=**

**XEERKA NOOTAA YOYOINKA (Xeer No: 18/2001).**

**QODOBKA 1AAD**

**TILMAAMTA XAFIISKA NOOTAYADA.**

- a) Xafiiska nootaayada waxaa loola jeeda xafiiska u xilsaaran qabashada adeegyada Sharci ee kala ah:
  - 1) Kala wareejinta Hantida Guurtada ah iyo Maguurtada
  - 2) Sharciyeenta Wakaaladaha.
  - 3) Samaynta iyo sugidda cadeymaha sharciga ah.
  - 4) Samaynta iyo sugidda heshiisyada sharciga waafaqsan.
  - 5) Samaynta iyo sugidda dardaarandadda.
  - 6) Samaynta iyo sugidda lahaanshaha, isla lahaanshaha iyo dhammaan hawlaha kale ee xeerku baneeyey.
- b) Xafiiskaasi oo ruqsad sharci ah ka haysta Wasaaradda Cadaaladda leh shakhsiyad qaynuuni ah wuxuuna xilkiisa u gudanaya si madax bannaan oo sharciga waafqsan.

**QODOBKA 2AAD.**

**SHURUUDAHA SARKAALKA NOOTAYADA.**

Sarkaalka Nootaayuhu waa inuu yahay qof aqoon u leh sharciga, haystaa Shahaado Sharci ama leeyahay waayo aragnimo (5 sano ah) oo luu kaga soo shaqeeyey Hay'addaha shuruucda ama Garsoorka.

1. Waa in uu yahay Qof Muwaadin Somaliland ah.
2. Waa inaan Da'adiisuna ka yareyn 30 sano.
3. Waa inuu Maskaxda ka fayow yahay.
4. Waa inuu haystaa Xafiis lagu shaqeyn karo.

### **QODOBKA 3AAD**

### **AWOODA XAFIISKA.**

Xafiiska Mihnada Nootaayadu wuxuu u madax bannaan yahay awooda sharcigu u baneynaayo.

### **QODOBKA 4AAD**

Sarkaalka Nootaayada ee haysta ruqsad Nootaayo, wuxuu wakiil ka yahay Wasaaradda Cadaaaladda.

### **QODOBKA 5AAD.**

Hawlaха Nootaayada ee ku cad Sharcigan waxaa sameyn kara oo kaliya sarkaalka uu magaciisu ku qoran yahay ruqsada ay bixisay Wasaarada Cadaaladdu. Cidii kale ee samaysa qoraalka khuseeya hawlaха nootayada waa wax kama jiraan (**Null and Void**).

### **QODOBKA 6AAD.**

1. Sarkaalka Nootaayadu hawlaха uu qabto hadii xafiisku ka furan yahay Caasimada wuxuu

nuqulo geynayaa. Wasaaradda Cadaaladda muddo 5 maalmood shaqo guddahood ah.

2. Haddii Xafiiska nootaayadu ka furan yahay meel ka baxsan Caasimadda nuqulkii Wasaaradda Cadaaladda waxa la geynayaa Maxkamadda Racfaanka ee Gobolka.

### **QODOBKA 7AAD**


1. Sarkaalka Nootaayadu waa inuu Xafiiska ku lahaadaa Magaaladda loo siiyey ruqsada oo kaliya.
2. Haddii uu ka guuro Xafiiskii lagu yaqiin waa inuu baahiyaa goobta uu u guuray, Wasaaradda Cadaaladda qoraal ku ogaysiiyaa.
3. Hadii sarkaalka Nootaayadu Dhinto ama ruqsada laga qaado, nuqulka ducumentiga Xafiiska ku kaydsan waxaa lagu wareejinyaa hadii Xafiisku Caasimada ka furan yahay Wasaaradda Cadaaladda, haddu Goboladda ka furan yahayna waxaa lagu wareejinyaa Maxkamada Racfaanka Gobolka Xafiisku ka furan yahay.

### **QODOBKA 8AAD.**

1. Haddii ay timaado Dhimasho Sarkaalka Nootaayada waa in ay eheladiisu ku soo ogaysiiyaan Wasaaradda Cadaaladda mudo aan ka badneyn 48 Saacadood wakhtiga Dhimashada si loo xafido ducumentiga Xafiiska.
2. Haddii aaney eheladiisu ka war hayna waxaa u xil saaran Hay'adaha nabad galyada, Dawladaha hoose ama Dawlada dhexe ee Gobol/ Degmo ama Maxkamadaha ay khuseyso.

## QODOBKA 9AAD

### **XILKA SARKAALKA NOOTAAYADA**



Sarkaalka Nootaayaddu wuxuu u xil saaran yahay:-

- 1) Wuxuu sugaa qoraalada Mucaamiladka dhinacyadu u kala qortaan si madax banaan isagoo dhexdhaxaada una xafidaya nuqulada qoraalada.
- 2) In uu sharciyeyo ama diwaan galiyo documentiga leh awood sharci oo si ikhtiyaar ah dhicayadu u kala qorteen sida sharciga waafaqsan ama xeerarku tilmaameen.
- 3) Wuxuu sugaa kala wareejinta lahaanshaha hantida guurtada ah ama maguurtada ah iyadoo sida loola kala wareegayo iyo shayga lala kala wareegayo ay waafaqsan yihiin shareecada iyo xeerarka dalku leeyahay.
- 4) In uu sameeyo caddaynta qoraalka maraga maqan.
- 5) In uu sameeyo ama sugo qoraaladda dardaaranka ah si sharciga waafaqsan.
- 6) Wuxuu qaban karaa hawlaho kale ee ay Maxkamaddu u wakiilato.
- 7) Turjumida Documenti hadii uu ka haysto ruqsad turjumaan sharchiyed Wasaaradda cadaaladada.

## QODOBKA 10AAD

### **QAABKA QORAAKA NOOTAAYADA.**

- 1) In uu qoraalka Nootaayada waraaqaha asalka (original) ay khad fiican oo la akhriyi karo ku qoran yihiin meel banaana aanay lahayn.

Ciwaanka hawl wadeenka Nootaayadu wuxuu ku bilaabaya bisinka illahay (**BISMILAABI RAXMAANI RAXIIM**).

- 2) In uu qoro saddexda magac, Meesha, Taariikhda Dhalashada iyo meesha degaanka u ah dhinacyada, Markhaatiyada, Damiintayaasha, Wakiilada iyo Turjumaanada marka ay jiraan.
- 3) Waa in ay ku hadhaa dhammaan caddaymaha qoraalada uu sameeyo Xafiisku hal nuqul oo la kaydiyo.
- 4) Inuu far (Xuruuf) ku qoran tahay lacagta ama tirada alaabta ama shayga qoraalka laga qoray.
- 5) Waa in lagu sugaa ama lagu cadeeya shayga laga hadlayo ama la wareejinayo marka arrintuu ku saabsan tahay maguурто, Caynka, Shayga, Qiyaasta Shayga, meesha uu ku yaalo iyo soohdimihiisa.
- 6) Haddii ay ku saabsan tahay baabuur IWM waa in lagu sugaa ama lagu caddeeya lambarka Taarikada, Lambarka Injiinka (Engine no) Lamabarka caqaayada (Chassis no).
- 7) In uu Indhihiisa ku arko shayga qoraalku ka hadlaayo ama la kala wareejinaayo.
- 8) Inuu sameeyo sarkaalka Nootaayadu Caddayn ama sugitaan Qof ahaaneed ee dhinacyada Damiintayaasha, Wakiilada, Turjumaanada si waafaqsan Diinta islaamka iyo Xeerarka Dalka u degsan.
- 9) In uu akhriyo qoraalka dhicayada iyagoo goob joog ah dhinayada ay khusayso.
- 10) Waa in ay qoraalka suulka bidix ku saxeexan dhinacyada, Markhaatiyada, Wakiilada

Damiintayaasha iyo Turjumaanada iyadoo Sarkaalka Nootaaayadu qalin ku saxeexayo. Qoraal kasta oo Nootaaayada ka soo baxa waa inuu yeesha arrin kasta oo xeerku waajibiyay.


- 11) Qoraalada Dardaaran in lagu gaddeeyo taariikhda, saacadda, Iyo magacyada dadka goob jooga ah (Markhaatiyaal) iyo kuwo loo dardaarmay hadday joogan.
- 12) Qoraalada ka kooban warqaddo badan waa in ay warqad kasta saxeexaan dhinacyada Markhaatiyada, Turjumaanada, Damiintayaasha iyo Sarkaalka Nootaaayada waxaa kale oo saxeexaya warqadda meesha ugu dambaysa Sarkaalka Nootaaayada isagoo isla markaana ku muujinay warqadda hoose magaca sarkaalka oo sadexan iyo saxeexiisa iyo shaambada xafiisku leeyahay

### **OODOBKA 11AAD.**

1. Haddii aanay dhinacyada Wakiilada ama Damiinka qaarkood aanay waxba akhriyin waa inuu qoraal ku caddeeya Sarkaalka Nootaayuhu loona akhriyaaa oo aya hadalkiisa waafasan tahay.
2. Qoraalada Nootaaayada waa la isugu gudbin karaa qalabka Isgaadhisiinta ee muujin kara shuruudaha qoraalka.

### **OODOBKA 12AAD**

#### **TIRADA NOOTAAAYOOYINKA.**

- 
1. Tirada Nootaayooyinka dalku waxay noqonayaan hadba intii buuxisa shuruudaha ku qeexan qdobka 2aad
  2. Kordhintaa ama yaryanta tirada Nootaayooyinka waxaa lagu salaynayaa kolba baahida Gobol lama Degmo ka jirta.

### **QODOBKA 13AAD**

### **SHURUUDAH A LAGA RABO MARKHAATIYADA**

Waa shuruudaha ku qeexan Shareecada Islaamka iyo Xeerarka kale ee dalku leeyahay.

### **QODOBKA 14AAD.**

### **SHURUUDAH DAMIINKA**

Qofka wax damiinanaya waa inuu lahaada Hanti ma Guurto ah oo ku taala meesha u damiinka ku galayo ama waa inuu haysto caddayn lahaansho hanti ma guurto ah uu ku uu ku leeyahay dalka gudhiisa.

### **QODOBKA 15AAD**

- 1) Qoraalka Nootaayadu waa inuu ku qornaado Afka soomaaliga haddii lagu qoro af Ajanabi ah waa in dhinacyada iyo Turjubaanku saxeexan.
- 2) Haddii qof dhaga la' ama aan waxba maqlin waxna akhriyi karin waa in Turjubaan u gaar ah oo uu aaminsan yahay loo sameeya Maxkamadda Degmada horteeda.

### **QODOBKA 16AAD**

### **AWOODA BIXINTA RUQSADA.**

Bixina Ruqsada Nootaayada waxaa awood u leh Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda oo ku soo saaraya digrii marka uu hubiyo Sarkaalka buuxiya shuruudaha laga rabo.



### **QODOOBKA 17AAD.**

### **DADKA KA MABNUUCA AH QAADASHADA RUQSADA NOOTAA YOYOINKA**

Ruqsada Nootaayada looma ogolaan karo:-

- 1) Qof ka tirsan shaqaalaha Dawladda ee Joogtada ah.
- 2) Qof ka tirsan Ciidamada Dawlada.
- 3) Qof ka shaqeeya Hay'adaha Caalamiga ah.

### **QODOOBKA 18AAD**

### **CIOABA TA SARKAALKA NOOTAA YADA.**

Sarkaalka Nootayadu haddii uu jabiyo shuruudaha Xeerkani qeexayo waxaa lagu anshax marinayaa:-

- 1) In Wasaaradda Cadaaladdu ay siiso digniin qoraal ah gafka ugu horeeya ka dib.
- 2) In aya gafka labaad shaqadda ka joojiso muddo aan ka badnayn (6 bilood) haddi aan dambi falkiisa ka dhalan.
- 3) In gafka sadexaadna laga qaado ruqsada iyo wakiilnimada Wasaaradda Cadaaladda.
- 4) Ruqsada ka qaadista Sarkaalka Nootaayada Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda ayaa ku soo saaraya Digrii (xeer wasiir) marka ay cadaato gafafka kor ku xusani.

## OODOBKA 19AAD.



### **CIQaabta ka BEEN-SHEEGIDA QIIMAHAY HANTIDA**

- 1) Sarkaalka Nootaayada ee yareeya qiimaha lagula kala wareego Hanti isagoo u dan leh si ay u yaraato Ajuurada Dawladdu waxaa lagu fulinaya Xatooyo xoolo dadweyne.
- 2) Hantiilaha ay ku cadaato wuxuu bixinayaan Ajuuradii la qariyay oo dhan waxaan la ganaaxaya 5% Ajuuradii baaqatay.
- 3) Nootaayada caadaysata ka been sheegida Hantida qiimaha la kala iibsaday waxaa laga qaadi doona ruqsada Nootaayada.

## OODOBKA 20AAD.

### **WAXYAABAHA KA REEBAN SARKAALKAA NOOTAAYADA.**

Waxaa ka reeban Sarkaalka Nootaayaha:-

- 1) Sarkaalka Nootaayaha waxaa ka reeban in uu bixiyo sir la xidhiidha qoraalada (ducumenti) lagu aaminay in uu xafido.
- 2) Sarkaalka Nootaayuhu ma kala wareejin karo hanti aan waddan caddaynta Lahaanshaha ku qeexan sida Xeerarka Dalka ku tilmaaman.
- 3) Sarkaalka Nootaayuhu ma samayn karo caddayn lahaansho ee Maxkamaduhu u xil saaran yihiin.
- 4) Sarkaalka Nootaayuhu ma diiwaan galin karo qoraalo aanay u dhamayn dhinacyda ay khusayso.
- 5) Sarkaalka nootaayadu ma diiwaan galin karo qoraal khuseeya Naftiisa, Aabihii, Caruurtiisa,

Walaadadiisa iyo Xaaskiisa (ooridiisa) xataa hadday Is fureen.

- 6) Sarkaalka Nootaahuhu kuma furan karo ruqsada Nootaayada laba Xafiis.
- 7) Sarkaalka nootaayuhu uma baaana in uu Xafiiska Nootaayaha la wadaajiyoo cid kale sida Meherad Ganacsi, Xafiis Qareen, NGO, IWM.
- 8) Sarkaalka Nootayada waxaa ka reeban Hibaynta Hantida Guurtada iyo Ma Guurtada ah.
- 9) Sarkaalka nootaayada waxa ka reeban in uu ka been sheego ama Qariyo qiimaha hantida uu kala wareejinayo.

#### **OODOBKA 21AAD.**

#### **DHAWRSANANTA SARKAALKA NOOTAAYADA.**


Sarkaalka Nootaayada looma xidhi karo arrimo la xidhiidha shaqadiisa ilaa ogolaansho laga helo Wasaaradda Cadaaladda hadii aan lagu qaban Dambi uu faraha kula jiro oo ciqaabtiisu 3 sano gaadhayso.

#### **OODOBKA 22AAD.**

#### **DHAWRSANANTA XAFIISKA NOOTAAYADA.**

- 1) Lama Xayiri karo lamana Baadhi karo Xafiiska Nootaayada haddii aan ogolaansho laga helin Wasaaradda Cadaaladda.
- 2) Xafiiska nootaayada laguma laha cashuur Liisan Ganacsi Sarkaalka. Nootaayaddu wuxuu bixinayaan cashuur sanadeedka dib jidiidinta Ruqsada nootaayada oo dhan 200,000 SL SH, oo ay qadayso Wasaaradda Maaliyaddu.

- 3) Ruqsada Nootaayo kasta oo la bixiyo waxaa laga qaadaya Cashuur Liisan oo dhan 100,000SL SH maalinta la bixiyo taasi oo ay qaadayso Wasaaradda Maaliyaddu.



### **OODOBKA 23AAD.**

### **TIRTIRID QORAAL**

- 1) Sarkaalka Nootaayuhu xaq buu u leeyahay in uu tirtiro ama gaadhsiiyo Hay'adaha sharciga, qoraal kasta oo uu ogaado un lagu khiyaameeyay Qaranka ama qaybo nuxurkiisa ah.
- 2) Qoraalka la waxaa waajib ah in qoraal ahaan lagu ogeysiyo dhinacyadii u dhex maray iyo Xafiisyadii lagu kaydiyey wax tar la'aantiisa.
- 3) Sarkaalka Nootaayuhu ma aqoonsan karo Dilaal aan ka diwaan gashanayn dawladaha hoose, waana in uu qaataa liisanka dawlada hoose.

### **OODOBKA 24AAD**

Sarkaalka Nootaayuhu xaq buu u leeyahay in uu ka qaato hawl kasta oo uu qabto Xushmad adeeg.

### **OODOBKA 25AAD**

### **XUSHMADA ADEEGA**

Xushmada Sarkaalka Nootaayuhu inta ay noqon karto waa sidan:-

❖ Kala Wareejinta Guryaha	1% R Fee
❖ Kala Wareejinta Gaadiidka	1% R Fee
❖ Wareejinta Dhulka	20,000
SL.SHILIN.	

❖ Wakaaladdaha	4000 SL SHILIN.
❖ Heshiisydda	5000 SL SHILIN.
❖ Araajida Caadiga ah Max.Hoose 4000 SL.SHILIN.	
❖ Dardaaranadda.	5000 SL SHILIN.
❖ Marag maqan	5000 SL.SHILIN.
❖ Lahaansha isla Lahaansho	4000 SL.SHILIN.
❖ Araajida Caadiga Maxkamda Sare/xeer- Ilaalinta Guud	5000 SL.SHILIN.



### **QODOBKA 26AAD**

#### **AJUURADA DAWLADDA.**

- 1) Qoraal kasta oo sharchiyeed (judiciary act) oo uu sameeyo Sarkaalka Nootaayuhu waxaa ku waajibaysa Cashuur Dawladeed oo xeer ka soo baxay Wasaaradda Maaliyadda iyo Golaha Wakiiladda jideeyay.
- 2) Dakhliga Sarkaalka Nootaayaha soo gala bishii inta uu noqdo waxaa waajib (income tax) Macashal Macash oo ay ku shubi doonan Wasaaradda Maaliyada.
- 3) Nootaayaha Dakhli badnaada xaraynta cashuuraha Dawladda waxaa la siin doonaa dhiiri galin Dakhliga uu soo xareeyay 5% Sanadkii.

### **QODONKA 27AAD**

#### **KORMEERKA IYO BAADHISTA.**

- 1) Wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Maaliyadda ayaa awood u leh amarka kormeerkay iyo baadhista ee Xafiisyada Nootaayada.

2) Baadhista arrimaha ku saabsan lacagta (Cashuuraha) waxaa u xil saaran Hanti-dhawrka Guud, baadhista arrimaha kale ee dambiyada la xidhiidha waxaa u xil saaran Xeer-ilaalinta.

**QODOBKA 28AAD.**

**TIRTIRIDA.**

Waxaa la tirtiray Sharciyadii hore ee Nootaayada iyo sharci kasta oo ka hor imanaya sharcigan

**QODOBKA 29AAD.**

**DHAQAN GAL**

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland

**ALLAA MAHAD LEH**

(C/QAADIR XAAJI ISMAACIIL JIRDE)

K/SIMAHAD GUDDOONIYAHAD GOLAHAD WAKILADA

(MAXAMED XUSEEN CISMAAN)

=XOGHAYAYA GUUD FE GOLAHAD WAKILADA JSI

